

Sharciga lambar 61 taariikh 10 Nof. 1981, Ku fidin
Dalka JDS Sharciga lambar 10 ee 17.12.1980:
Sharciga Dhulka Dhismaha ee G. Banaadir.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga
Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

Sharciga soo socda:

Qod. 1a:1

Sharciga lambar 10 ee 17.12.1980, kuna saabsan
Maamulka Dhulka Dhismaha ee Gobolka Banaadir,
waxaa lagu fidiyey Gobollada J.D.S. oo dhan.

Qod. 2aad

Wixii ka dambeeya taariikhda uu dhaqan galo
Sharcigan, maamulka iyo bixinta dhulka dhismaha,
meel kasta ee Jamhuuriyadda ha ahaatee, waxaa Qa-
ranka uga wakiil ah Dawladda Hoose ee Degmooyinka
JDS, iyadoo Dawladda Hoose ee kasta ay dhowreyso
soohdinta degaankeeda.

Qod. 3aad

1. Dhul kasta oo la bixinayo wuxuu noqonayaa
mid ku saleysanjaangooyo guud (TOWN PLANNING)
oo hore loo sameeyey, lcona oggolaaday.

2. Jaangooyada waa in lagu muujiyaa dhulka loo-
gu talo galay degsiimada, warshadaha, gancsiga, dana-
ha caamka ah, nabadjelyada iyo hawlahaa adeegga ee
lagama maarmaanka u ah nolol maalmeedka Bulsha-
da.

3. Jaangooyada Degmo kasta waxaa oggolaana-
ya Wasiirka Wasaaradda Hawlahaa Guud.

Qod. 4aad

Il aaiyo inta ay ka helayaan Farsamo-Yaqaanno gaar ah. Dawladaha Hoose waxaa la shaqaynaya Farsamo-yaqaannda Wasaaradda Hawlaha Guud ee Degmada ama Gobolka jooga.

Qod. 5aad

1. Dawladaha Hoose markey dhul saayaan qof, urur, ama hay'ad, waa in nuqul qoraallada dhul bixin-ta ay u soo diraan Wasaaradda H.G., si loo geliyo Dii-waanka guud (catasta), laguna xannaaneeyo.

2. Wasaaradda H.G. waxay u xilsaaran tahay uruurinta iyo diiwaangelinta dhulka dhismaha ee Qaranka oo dhan.

Qod. 6aad

Wasaaradda H.G. waxay ku kormeereysaa Dawladaha Hoose fulinta jaangooyada degaanka, waxayna awood u leedahay in ay joojiso dhul kasta oo lagu baxnay si khilaafsan jaangooyada magaalada.

Qod. 7aad

Waxaa Dawladaha Hoose ka reeban in ay bixiyaan dhulalka xeebaha, kuwa beeraha, daaqa iyo meelaha macdanta laga qodo oo shuruuc gaar ah lagu maamulo.

Qod. 8aad

Sharci kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin Sharcigan waa la buriyey.

Qod. 9aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Janhuuriyadda.

Muqdisho; 10 Nof. 1981

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)